

Dhismeyaasha yaryar

Waa in laga hortago nabaadguurka iyadoo la ilaalinayo biyaha Minnesota marka uu socdo dhisme, dib-u-dhisid iyo mashruucyada goobaha nasashada.

Ciiddo keligeed ayey nabaadguurtaa marka ay socdaan dhismaha iyo mashaaruucyada goobaha nasashada. In kasta oo ciiddo ay tahay wax dabiici ah, haddana waxa ay wasakheyn kartaa harooyinka, webiyada iyo togagga iyadoo neefta ku celineysa noolaha ku hoos jira iyo biyaha oo ay ka dhigto calow aan lagu dabaalan karin.



Ka-hortaggidda Wasakhda daadadka Badan

Guri cusub ma dhisaneytaa?

Talooyin ah ka-hortaggidda nabaadguurka iyo wasakhda daadadka badan ka eego jaantus ku sawiran dhinacaba dambe ee boggan.

Marka dhismuhu socdo, xaqiiji in dadka wax kuu dhisaya ay gurigaaga ku sameeyaan deyd wasakh-celin ah ama waxyaabo kale oo wasakhda ka celin kara gunta biyaha, geesaha jidka lagu lugeeyo, majarafadaha roobka, godadka, togagga, harooyinka iyo dhulka qoyan. Gebi ahaan carrada muuqata waa in la daboolo oo waa in la simo ciidda isku uruursan.

Milkiile kasta oo guri leh waxa uu masuul ka yahay eegista iyo ka-warhaynta dhulka oo si ku meel gaar ah wax looga qabto ilaa laga duugo god kasta oo ka mid ah dhulka dhismaha. Dib u samee ama beddel shabaqa siligga gidaarka ah ee dillaacday, isku-dhegay, ama jeexjeexmay oo ka saar biraha haddii ay garaan 1/3 ah siliggii xayndaabka dhererkiisa. Isticmaal qeybiso si aad uga ilaaliso waxyaabaha ku meelgaarka ah ee ilaa saqafka ilaa ay dhir iyo doog soo baxaan.

Ma abuuraneyaa caws cusub?

Ciidda ku dabool marada nabaad-guurka, qolofa geedaha, ama sannad kasta cawska dalagga la socda sida galley, badar ama qamadiga qaboobaha ilaa aad cawska dusha ama iniino gelin karto. Marada nabaadguurka ayaa weliba kugu caawin karta ilaalinta meelaha xoogaa buuraha ah ilaa uu cawska cusub si buuxda uga soo baxo.

Ma sameysaneyaa dhul-cawseed daarad ah?

Qorsheyso dhigidda cawska mar aan roob jirin oo cimiladu tahay kuleylaha. Ciidda muuqata ku dabool qolof geedo oo iska ilaali inaad taabato ciidda hareeraha togagga iyo xeebaha harooyinka. Eeg sida dhinaca biyuhu uga gudbaan gurigaaga oo isticmaal geedaha, saaqsaqa, geedaha meeshaas keliya ka baxa, iyo fadhi-roobaadka si ay u yareyso xawliga iyo si aad uga hortagto nabaadguurka.


Waxaan rabnaa in dadku ku dedaalo nadaafadda biyaha!

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Minnesota ka eego www.pca.state.mn.us/waste


10 Siyaabood oo ah Ka-hortagidda Wasakhda Daadadka Badan ee Dhismeyaasha Yaryar ee Xaafadaha

Ogow: jaantuskan kama hadlayo shuruudaha helidda oggolaanshaha ee dhismaha badan oo ka dib.

- 1** Ilaalinta Goobaha Beerista Khudaarta ama Habka Gelidda Biyaha Dhulka iyo Dhowrida Dhirta Kuu Beeran
Haddii aad hoos gelineyso qalabka habka gelidda biyaha dhulka sida dhulka daaradda ama biyaha wasakheysan, iska hubso in ay meelahaasi yihiin meelaha saxda ah oo aysan dadkuna gaari karin. Dhaqaaleyo wakhtiga iyo lacagta adigoo ilaalinaya geedaha waaweyn ee horay ugu yaallay goobta dhismaha. Geedaha waaweyn oo la ilaaliyo ayaa yareyneysa xaddiga carrada u baahan in la xasiliyo marka dhismuhu dhammaado, waxayna yareyneysaa qulqulka biyaha inta lagu jiro iyo ka dib hawsha dhismaha.
- 2** Keydso Carradaada
MPCA qeybteeda CGP waxay rabaan inaan la khasaarin ciidda kore intii ay macquul tahay si loo ilaaliyo ciidda la soo bixiyey ee la tuuray in aysan kaa qulqulin sida daadka. Ciidda xoogaa tuurka ah waa in gebigeedba lagu daboolo bac adag oo ku filan.
- 3** Qalabka Dhismaha Qoyaanka iyo Wasakheynta ka Dhowr
Maalin kasta markaad shaqo qabato oo uu jiro roob, daboolo alaabta dhismaha ee dhulka taalla si aysan wasakh u keenin.
- 4** Diyaarso Haamaha Qashinqubka
Si cad u kala saar noocyada qashinqubka kiimikada halista ah, qashinka dhismaha, iyo qashinka guryaha oo kala calaamadso, oo ka ilaali in ay biyo qooyaan ama ay kaa qaataan.
- 5** Sameyso Deyd ah Xakameynta Degaandegga Dhulka
Sameyso xakameyn ah shaandho reebta qashinka gunta biyaha ama gidaar ku wareegsan gurigaaga. Iska hubso inaad soo tuurto qashinka gunta biyaha mar kasta oo ay haanta qashinqubka buuxsanto.
- 6** Sameyso Gidaar Qashincel ah
Diiwaanka xakamaynta fayaqabka, caqabadaha quruurux, iyo ciidda ama bacaha dhagaxa weyn ayaa ah xulashooyinka koontaroolada marinka laga galo. Hubso inaad ka saarto faaruqinta mar kasta oo ay gaadho kala-badha koontaroolka.
- 7** Samee Shamiito/Dhul Adag oo ah Biya-raacin
Diyaarso bac adag oo celisa dareeraha ilaa dhulka hoose si aad jidka ugu biya raaciso shamiitada iyo jeyga cawska engajiyi. Marna ha iska badin shamiitada iyo quruuruxa oo bullaacadaha roobka yeysan u gudbin!
- 8** Samee Jid Yare ah Bixid
Sidaas ku yaree qashinka gunta biyaha in aysan ku qulqulin jidka baabuurta qashinka dhismaha balse burburi qashinka fariista gunta biyaha ee ku firaarsan gogosha bacda, meelaha kale, ama iska dhaq quruuruxa dhismaha. Haddii qashinka gunta biyaha fariista ay cawska gaaraan, isla markaad ogaato 24 saacadood gudahood uga nadiifi.



- 9** Guriga ku Hayso Koobbiga Waraaqaha Oggolaanshaha iyo Naqshadda ama SWPP
Guriga ku hayso waraaqaha SWPP oo dhan, oo ay ku jiraan maab muujinaya dhismaha BMP, iyo caddeymo qoran oo ah la socoshada kormeereyaasha magaalada oo waa inaad dhakhso u keeni karto.



Gabagabada Dhismaha
Sida ugu dhakhso badan u samee meelaha lugeynta ee goobta mar kasta oo shaqada dhismaha ay joogsan doonto 14 maalmood ama in ka badan, xataa haddii aad shaqada si ku meelgaar ah u joojiso. Xusuusnow, xasilinta kama dambaysta ah waxaa la isaga baahan yahay ka hor intuuusan kaa dhicin oggolaanshaha dhismaha.

Maskaxda ku hay in aad 7 maalmood ku dhammeyso xasilinta jidka ku meel gaarka ah ama joogtada ah haddii ay hawshaada dhismaha ku egtahay ilaa 1 meyl oo ah goob biyo gaar ah ama aysan biyo ka jirin.

Tixgelinta Dhismeyaasha Yaryar

Waad ku mahadsan tahay sida aad qeyb uga tahay ilaalinta biyaha Minnesota!

www.pca.state.mn.us/water/construction-stormwater

Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir:
[Insert local contact here]